



# Doorashooyinka ceymis kujirida loogu talagalay dadka kelida ah iyo kuwa waaweyn ee qabba naafooyin

Apple Health (Medicaid) wuxuu bixiyaa caymiska shakhsiyaadka ay da'doodu tahay 65 ama ka weyn, kuwaas oo indhoole ama naafo ah, ama u baahan taageero iyo adeegyo muddo dheer (LTSS).

## Kuwa Waayeelka, Indhoolaha, ama Naafada ah (ABD)

Haddii aad tahay qof jira 65 iyo kaweyn, indhoole, ama naafo oona buuxisid shuruudaha dakhliga iyo macluumaada, Washington Apple Health (caawimaada Caafimaadka) waxaa dhici karta in aad bixiso ceymis kujirid daryeel caafimaad iyo lacag bixin caawimaad oo loogu talagalay lacagta ceymiska caawimaada Caafimaadka iyo kharashaadka daawada.

Haddii aad rabto macluumaadka ku saabsan ikhtiyaarada caymiska, oo ay ku jiraan Hospice, booqo [hca.wa.gov/free-or-low-cost-health-care/i-need-medical-dental-or-vision-care/long-term-care-and-hospice](https://hca.wa.gov/free-or-low-cost-health-care/i-need-medical-dental-or-vision-care/long-term-care-and-hospice).

## Codsashada caymiska ABD

- **Barta internet-ka:** Booqo [washingtonconnection.org](https://www.washingtonconnection.org).
- **Codsiga waraaqda ah:** Daabac Foomka 18-005, laga helo boggaan intarnatka [hca.wa.gov/classic-health-care-application](https://hca.wa.gov/classic-health-care-application)
  - ♦ **Boostada:** DSHS Community Services Division, P.O. Box 11699, Tacoma, WA 98411-6699.
- **Shakhsi ahaan:** Booqo Xafiiska Adeegaha Bulshada kuu dhow. Booqo [dshs.wa.gov/office-locations](https://dshs.wa.gov/office-locations).
- Haddii aad su'aalo qabto ka wac adeegga macmiilka DSHS 1-877-501-2233.

## Taageerooyinka iyo adeegyada muddada-dheer (LTSS)

Apple Health waxay bixinaysaa adeego gurigaaga ah, meel daryeel deganaansho bulsho, meel noolaansho caawimaad, guriga qoyska dadka waaweyn, ama meel kalkaal in haddii aad buuxisid shardi gaar ah oo kusalaysan qiimeynta.

Taageerada Ku Habboon Dadka Waaweyn (TSOA) iyo Daryeelka Beddelka ah ee Medicaid (MAC) waa barnaamijyada LTSS ee caawiya daryeelayaasha hadda ee sida lacag la'aanta ah ku daryeelaya saaxiib ama xubin qoyska.

## Codsashada LTSS

- **Barta internet-ka:** Booqo [washingtonconnection.org](https://www.washingtonconnection.org).
- **Codsiga waraaqda ah:** Daabac Foomka 18-005, laga helo boggaan intarnatka [hca.wa.gov/classic-health-care-application](https://hca.wa.gov/classic-health-care-application)
- **Shakhsi ahaan:** Booqo xafiiska Adeegyada Bulshada iyo Guriga ee kuu dhow. Booqo [dshs.wa.gov/office-locations](https://dshs.wa.gov/office-locations).
- Haddii aad su'aalo qabto wac xafiiska Adeegyada Bulshada iyo Guriga ee degaankaaga. Booqo [dshs.wa.gov/office-locations](https://dshs.wa.gov/office-locations).

**Ogow:** Shuruudaha kheyraadka iyo dakhliga ayaa ku dabaqma barnaamijyadan.



## Naafonimada hadalka ama maqalka, ama dhibaatooyinka dhaqdhaqaaqa

Haddii aad qabtid naafonimada maqalka ama hadalka ah ama dhibaato dhaqdhaqaaq, waa in aad u sheegtaa shaqaalaha soo-dhaweynta marka aad ballantaada sameysato. Shaqaalaha soo-dhaweynta jooga rugta bixisa adeeggaaga caafimaadka ayaa kugu caawin doona qabanqaabo kasta oo lagama maarmaan ah.

### Adeegyo Turjumaan

Haddii aadan si fiican ugu hadlin luuqada Af Ingiriiska ama aad tahay dhagoole, Indhoole Dhagool ah, ama uu Kugu Adag Yahay Maqalka, turjumaanno xirfadlayaal ah ayaa lagu heli karaa luuqado badan, oo ay ku jiraan luuqadda dhagoolayaasha ee tilmaan bixinta oo lacag la'aan ah. Ogeysii shaqaalaha soo-dhaweynta in aad u baahan tahay turjumaan marka aad ballanta qabsanayso. Macluumaadka dheeradka ah, booqo [hca.wa.gov/interpreter-services](https://hca.wa.gov/interpreter-services).

## Gaadiidka services

Waxaad xaq-u-yeellan kartaa caawimaadda gaadiidka lagu tagayo ballantaada daryeelka caafimaadka oo lacag la'aan ah. Ballantu waa in ay noqotaa mid loogu talagalay adeegyada caymiska Apple Health. Haddii aad caawimaad ugu baahan tahay helitaanka gaadiid ama takhtar ku sugan degaankaaga, fadlan wac 1-800-562-3022. Macluumaadka dheeradka ah, booqo [hca.wa.gov/transportation-help](https://hca.wa.gov/transportation-help).

Maamulka Daryeelka Caafimaadka wuxuu u hoggaansamayaa dhammaan sharciyada xuquuqda madaniga ah ee gobolka Washington iyo dowladda federaalka waxaana ka go'an in uu suurtageliyo in si siman loo helo adeegyadeenna. Haddii aad u baahan tahay diyaafadin, ama u baahan tahay dokumeentiyo ku qoran luuqad kale ama qaab kale ah, fadlan wac 1-800-562-3022 (TRS: 711).

